ODHS waxay yeelatay naqshad cusub. Ogow wax dheeri ah.

Farriintan waxaa la soo galiyay onlaynka iyadoo ku qoran af اللغة العربية, English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

**Agoosto 6, 2025**

**Ku socoto:** Danwadaagta iyo bulshada Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS)

**Ka socoto:** Fariborz Pakseresht, Agaasimaha, ODHS

## Isbeddelada hoggaanka ee ODHS iyo Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka

Toddobaadkii hore, waxaan ku dhawaaqay in Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (Oregon Department of Human Services, ODHS) ay dib u furtay raadinta agaasime joogto ah ee Xafiiska Adeegyada Naafada Koboceed (Office of Developmental Disabilities Services, ODDS). War dheeraad ah ayaan ka hayaa kala-guurkan.

Markay tahay Agoosto 11, 2025:

- Ku-Xigeenka Madaxa Sare Hawlgallada ODHS Jeff Akin ayaa noqon doona agaasimaha ku-meel gaarka ah ee ODDS. Jeff ayaa sii hayn doona shaqadan ilaa aanu ka helayno agaasime guud oo ODDS leedahay.
- Dana Hittle waxay ku soo laaban doontaa Xafiiska Agaasimaha ODHS. Waxay ahaan doontaa la-taliyaha sare ee siyaasadda Medicaid iyo isku dhafka nidaamyada. Dana waxay sii wadi doontaa inay taageerto Jeff iyo kooxda ODDS inta lagu jiro kala-guurkan.

Jeff wuxuu ku soo biiray ODHS Maarso 2005. Wuxuu soo qabtay jagooyin hoggaamin oo badan. Kuwani waxaa ka mid ah ku-xigeenka madaxa sare hawlgallada, maamulaha Qaybta Hubinta Sooyaalka iyo maamulaha Adeegyada Maaraynta Raajooyinka iyo Diiwaanada (Imaging and Records Management Services, IRMS). Jeff wuxuu horseed u ahaa casriyeynta hannaankeena hubinta sooyaalka.

Jeff waa hoggaamiye cid kasta deeqa. Wuxuu abuuraa deegaan soodhawayn u leh shaqaalaha, macaamiisha iyo danwadaagta. Wuxuu si joogto ah u horumariyaa hawlgalladeena iyo bixinta adeegga. Intuu hoggaanka hayey, IRMS waxay shaqaalaysay shakhsiyaad qaba naaanimada garaadka iyo korriinka. Oregon Resource Association ayaa

aqoonsadeen shaqadan iyagoo u magacaabay IRMS Loo-shaqeeyaha Dadwaynaha 2022 ee Sanadka.

Dana waxay khibrad qoto-dheer u leedahay Medicaid iyo ka shaqaynta nidaamyada kala duwan si ay ugu adeegto shakhsiyaadka iyo qoysaska. Sidoo kale waxay awood xooggan u leedahay inay isku keento dadka iyo ururada si ay u horumariso nidaamyada. Waxay shaqada ka bilawday Xafiiska ODHS ee Waayeelka iyo Dadka Naafada Qaba. 2013kii, waxay u soo wareegtay Maamulka Caafimaadka Oregon si ay uga shaqayso barnaamijka Medicaid ee Oregon. Intii ay hoggaanka haysay iyadoo ahayd agaasime Medicaid, Oregon waxay noqotay gobolka ugu horreeya ee dadka siiya caymiska Medicaid oo joogto ah laga bilaabo markuu qofku dhasho ilaa lix jirkiisa. Oregon sidoo kale waxay noqotay tii ugu horrayay ee ansixin u hesha inay bixiso adeegyada loogu talogalay baahiyaha bulsheed ee caafimaadka la xiriira.

Dana waxay dib ugu soo biirtay ODHS Oktoobar 2023 si ay uga shaqayso Xafiiska Agaasimaha. Intaas kadibna waxay noqotay agaasime ku-xigeenka kumeelgaarka ah ee ODDS, 16kii bilood ee tagayna, waxay ahayd agaasime kumeelgaar ah.

Waxaan uga mahadcelinayaa Dana iyo Jeff inay hoggaamiyeen ODDS wakhtigan kala-guurka ah. Sidoo kale waxaan u mahadcelinayaa

shaqaalaha iyo danwadaagta ODDS. Waxaad wanaajiseen adeegyadayada waxaadna u diyaariseen agaasimaha mustaqbalka ODDS inuu guuleysto.

Sidaan qoray toddobaadkii hore, waxaanu dib u furnay raadinta agaasimaha joogtada ah ee ODDS. La wadaag shaqadaas la soo dhejiyay cid kasta oo xiisayn karta. Waad ku mahadsan tihiin inaad naga caawisaan shaqaalaynta shaqo-doon karti leh.

Daacadnimo,



Fariborz Pakseresht (isaga/iyada)

Agaasimaha, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon

---

Isku diiwaangeli wargelinada Adeegyada Aadanaha ee Oregon (Oregon Department of Human Services).

Dokumeentigan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. Iimayl ku dir dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov ama wac 503-945-5811.

Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.